



Farriintani waxaa iyada oo ah Ingiriisi, Русский, Soomaali, Español, 简体中文, Tiếng Việt la soo geliyay: <https://www.oregon.gov/dhs/SENIORS-DISABILITIES/DD/Pages/messages.aspx>.

Febraayo 8, 2022

Ku socota: Hawl wadaagayaasha ODDS iyo Daryeel Bixiyayaasha
Ka socota: Lilia Teninty, Agaasimaha, Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka
Ujeedada: Go'aan Gaarida La taageero

Sharci cusub oo dhaqan galaya Janaayo, 1, 2022 ee la xiriira go'aan gaarida la taageero. Sharciga ayaa u baahan in dugsiyada Oregon ay bixiyaan macluumaad, tababar, iyo ilaha ee ku sabsan go'aan gaarida la taageero.

Go'aan gaarida la taageero waxay isbeddel weyn u noqon kartaa mas'uulnimada taasi oo dadka naafada ah u oggolaata in ay gaaraan kala doorashooyin ku saabsan noloshadooda iyaga oo taageero ka helaya dadka ay aaminsan yihiin. Kani waa hab dadka oo dhani isticmaalaan laakiin inta badan waa la iska indhatiraa. Dadka qaba naafanimadu waxay isticmaalaan go'aan gaarida la taageero si loo ogaado cidda ay rabaan in ay taageeraan iyo sida ay u doonayaan in loo taageero. Qofka wax taageera ee ay doortaan ayaa ka caawin kara soo ururinta macluumaadka, qiimeynta waxyaabaha la kala dooranayo, ama kala xiriirida go'aankooda ee dadka kale.

Waaxda Adeegyada Dadweynaha ee Oregon (ODHS) iyo Waaxda Waxbarashada ee Oregon ayaa iskaashi la yeeshay daneenayaasha si loo aqoonsado oo loo dejiyo tababar, macluumaad, iyo ilo, ku saabsan go'aan gaarida la taageero.

ODHS ayaa bilawday [bogga internet-ka oo cusub](#) oo laha xaashida xaqiiqada, buug-yare iyo ilo kale oo ku saabsan go'aan gaarida la taageero. Xaashida xaqiiqada iyo buug-yaraha ayaa la helayaa iyaga oo ku qoran shan luqaddood. Intaasi waxaa dheer, in uu jiro [podcast](#) oo ay weheliso Allison Enriquezoo oo ka socota ODDS iyo Sally Simich oo ka

socota Waaxda Waxbarashada ee Oregon oo ka hadlaya sababta go'aan gaarida la taageero ay beddel muhiim ah ugu tahay mas'uulnimada.

Tababaro iyo ilo ayaa lagu dari doonaa [bogga internet-ka](#) marka ay noqdaan kuwo la heli karo.

Si Daacadnimo leh,

Lilia Teninty
Agaasimaha
Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka

Farriintii Agaasimihii hore ayaa laga heli karaa
<http://www.oregon.gov/DHS/SENIORS-DISABILITIES/DD/Pages/messages.aspx>

Nagala soco Facebook @oregonDHS.IDD ama twitter @OregonODDS oo wax ka ogow website-keena.

Waxaad heli kartaa dokumentigan oo ku qoran luqaddo kale, far waaweyn, farta dadka indhaha aan qabin wax ku akhriyaan ee braille ama qaabka aad doorbidayso. Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka ee Oregon kala xiriir 503-945-5811. Waa aqbalnaa wicitaanada gudbinta oo dhan ama waxaad wici kartaa 711.